

# Isdiiwaangelinta Tooska ah ee Minnesota

## **Safarkaaga tacliinta sare wuxuu ku bilaamanayaa Isdiiwaangelinta Tooska ah.**

Barnaamijka Isdiiwaangelinta Tooska ah waxaa loo sameeyay in lagu xaqijiyo in aad ogato in aad gobolka ku leedahay dookhyo badan oo kuleej. Marka aad adeegsato Diiwaan gelinta Tooska ah, uma baahnid inaad ka walwasho “wma heli doonaa kuleeh?” waayo waxaad helaysaa wargelinta hordhaca ah ee kuleejyada iyo jaamacadaha ku jira barnaamijka ee aad ka heshay aqbalaada - xataa kahor inta aadan codsan! Xili dayreedkaan, waxaad helaysaa waraaq ay ku qoran yihii liiska kuleejyada iyo jaamacadaha barnaamijka qaybta ka ah ee diyaarka u ah inay ku qaataan ayagoo ku saleynaya diwaanadaada tacliinta. Fariintaan waxay qeexi doontaa tallaabooyinkaaga xigga si aad u hesho gelitaanka dugsiga saxda ah ee adiga kugu habboon!



Waxaan dooneynaa in dhammaan dadka waawayn ee ka qalanjibinaayaa Minnesota inay ogaadaan inaad gobolka ku leedahay dookhyo badan oo kuleej! Haddii aad dooneyso inaad dhigato jaamacad afar sano ah, kuleej bulsho oo laba sano ah, dugsi ganacsi ama kuleej farsamo, waxaa jira fursadaha badan ee dugsiga sare kadib ee mudada dheer iyo mudada gaaban oo ka qaybgalaaya Isdiiwaangelinta Tooska ah.



## **Liiska Hubinta ee Ardayga:**

*Si aad qaab buuxa uga faa'iideysato barnaamijka Isdiiwaangelinta Tooska ah, adeegso liiska hubinta si aad ula socoto wax kasta!*

### **BISH OKTOOBAR EE SANADKAAGA UGU DANBEEYA DUGSIGA SARE**



#### **Waxaad helaysaa aadna akhrinaysa dukumiintiga Isdiiwaangelinta Tooska ah:**

Diyaar garoow! Waxaad heli doontaa nuqulka waraaqda ah iyo nuqulka oonlaynka ah ee waraaqdaada Diiwaan gelinta Tooska ah, taasoo ay ku qornaan doonaan dhammaan kuleejyada aad ka helayo Diiwaan Gelinta Tooska ah.



**Dooro kuleejyadaada:** Waraaqdaada oonlaynka ah, ka dooro kuleejyada iyo jaamacadaha aad doonayso inaad ka hesho Diiwaan gelin Toos ah. Dib ugu celi waraaqda dugsigaaga sare, kadibna buuxi codsiga ku jira barta oonlaynka ah. Ayadoo ku xiran kuleejyada la doortay, waxaad heli doontaa waraaqahaaga aqbalaada! Qaar kamid ah kuleejyada ayaa codsan doona xog dheeri ah, marka kala soco sanduuqa fariimaha iimeelkaaga talaabooyinka xiga.

### **DAYRTA ILAA GU'GA SANADKAAGA UGU DANBEEYA DUGSIGA SARE**



**Wax ka ogoow dookhyadaada:** Go'aanso kuleejka ama jaamacada kugu habboon! Booqo [MyHigherEd.mn.gov](http://MyHigherEd.mn.gov) oo isticmaal aalada baaritaanka kuleejka si aad iskugu barbardhigto iskuna eegto dookhyadaada ku aadan xogta kuleejka, dookhyada barnaamijka, cabirkha xarunta waxbarashada, tuushinka iyo waxyaboo badan oo kale.



**Dhameystir FAFSA iyo waxna ka oggooww dookhyada dhaqaalaha ee kaalmada ah:** Codsiga Bilaashka ah ee Kaalmada Ardayga ee Federaalka (FAFSA) waa tallaabada ugu muhiimsan ee aad qaadi karto si aad u bixiso kharashka kuleejka. Kordhi fursada aad ku helayo deeqo, waxbarasho bilaash ah, iyo kaalmo dhaqaale oo kale. Sidoo kale waxaad la xariiri kartaa la-taliyaha dugsigaaga si aad u hubiso in hawsha qalinjabintu si fican u socoto aadna u oggaato waxbarashada bilaashka ah ee dugsiga iyo deeqaha aad codsan karto.



**Gaar go'aankaaga ugu danbeeyaa:** Diirada saar talaabooyinkaaga xigga! Kadib marka aad tixgeliso dhammaan dookhyadaada, waa inaad xaqijisaa diiwaan gelintaada dayrtaa ee kuleejka aad rabto.

## **Isdiiwaangelinta Tooska ah GUUDMAR**

“Isdiiwaangelinta Tooska ah” waxaa loola jeedaa in ardaydu helaan diiwaangelin shuruud ama damaanad qaad leh ka helaan kuleej ama jaamacad, ayadoo ku xiran machadka.

Ardaydu waa inay dhameystiraan codsiga kuleejka (khidmada la dhaafay) waana inay soo gudbiyaan macluumaad dheeraad ah si ay qaab rasmi ah u xaqijiyaa inay xadirayaan kuleejyada ay doortaan.

## **Kuleejyada ka Qaybgalaaya**

- 120+ dugsiyada sare ah ayaa ka qaybgalaaya
- 23,000+ arday oo dugsiga sare dhamaynaysa ayaa ka qaybgalaaya
- 55+ kuleej iyo jaamacado - ayna ku jiraan dugsiyada farsamada, kuleejyada qabiilka, kuleejyada bulshada, jaamacadaha dawlada iyo gaarka loo leeyahay ee afarta sano ah

*Iskaan garee  
koodhka QR  
si aad u hesho  
macluumaad  
dheeraad ah:*





- ✓ **Waxaad diyaar u tahay kuleej.**
- ✓ **Waxaad haysataa dookhyo.**

Kuleejyada Minnesota iyo jaamacadaha waxay diyaar u yihiin inay kusoo dhaweeyaan dayrta xiggtaa.

## SI BILAASH AH U CODSO

Waa LACAG LA'AAN inaad cadsato kuleejyada iyo jaamacadaha ka qayb qaadanaya Diiwaangelinta Tooska ah

### Bixinta Lacagta Kuleejka

Waxaa jira dookhyo badan oo kaa caawin kara inaad qorsheysa sida aad u bixinayso kharashka kuleejka aadna u yaraynayso kharashkaaga guud!

### Dhameystir FAFSA

Waxaan si adag kuugu dhiirigelinaynaa inaad cadsato kaalmada maaliyadeed iyadoo loo maraayo Codsiga Bilaashka ah ee Gargaarka Ardayga ee Federalka (FAFSA) ama Sharciga MN Dream, oo loo isticmaalo in lagu go'aamiyo u qalmitaanka kaalmada dhaqaalaha. Deeqaha dawlada dhexe ee Pell iyo Deeqaha Gobolka Minnesota waxay deeqo siyyaan in ka badan 120,000 arday sanad kasta. Kala bar dhammaan ardayda cadsata deeqaha waxay helaan Deeqaha Pell ama Deeqaha Gobolka Minnesota ay bixiyaan! Deequhu waxay ku saleysan yihiin kharashka kuleejka ardaygu doortay, tirada qoyska, iyo dakhliga.

### Halkee ka bilaabaa?

Webseedka Kaalmada Ardayga ee federaalka ([studentaid.gov](http://studentaid.gov)) ayaa ah meel fiican oo laga bilaabo buuxinta cadsiga FAFSA Ardayda aan sharciga haysan, buuxi Sharciga MN Dream ([www.ohe.state.mn.us/MNDreamAct](http://www.ohe.state.mn.us/MNDreamAct)).

Waxaa intas dheer, hubi qaybta kaalmada dhaqaalaha ee kuleej kasta ama jaamacad kasta oo aad xiisaynayo. Xxog badan ka ogoow waqtigooda kama dambeysta ah iyo habka cadsiga deeqaha waxbarasho loo maraayo iyo noocyada kale ee kaalmada kuleejka ee la bixiyo.

### Su'aalaha Badanaa la Isweydiyo

#### Sidee la iigu doortay kuleejka iyo jaamacadaha liiskayga ku jira?

Waxaa lagu sinayaa Diiwaan gelinta Tooska ah ee kuleejyada iyo jaamacadaha ku jira liiskaaga ayadoo lagu saleynaayo GPA gaaga hadda iyo koorsooyinka aad dhamaysay dhammaadka sanadkaagii qaybta hoose ee dugsiga sare. Kuleejyada iyo jaamacadaha aaya xili hore doorta qaybaha shuruudaha diiwaan gelinta si loo go'aansho ardayda ay doonayaan inay siyyaan Diiwaan gelin Toos ah.

#### Wali miyaan u baahanahay inaan helo meelaynta/imtixaanka caadiga ah sida ACT ama SAT?

Iyadoo kuleejyo iyo jaamacado badan oo ka qaybgalaya barnamijka Diiwaangelinta Tooska ah aysan uga baahnayn ardaydu inay soo gudbiyaan buundooyinkooda ACT ama SAT, ardaydu waa inay wali la tashadaan maamulaha machadyada ay doortaan si ay u ogaadaan wax badan oo ku saabsan tallooyinka imtixaankooda hadda. Waxaa laga yaabaa in laaga cadsado inaad soo gudbiso buundooyinka imtixaanka ACT ama SAT haddii machadku u baahdo.

#### Wali miyaan u baahanahay inaan buuxiyo cadsiga diiwaangelinta?

Haa! Barnamijka Diiwaangelinta Tooska ah wuxuu kuu oggolaanayaa inaad ogaato fursadahaaga kuleejyada ay ka go'an tahay inay ku diiwaangeliyan, laakiin waa inaad buuxisaa cadsiga diiwaanka si aad boos u hesho. Xasuusnoo - cadsigaagu waa bilaash! Marka aad u dirto waraaqdaada oonlaynka ah ee aad ku celinayso dugsiga sare, waxaad buuxin doontaa cadsiga oonlaynka ah. Xaqiji inaad nasiiso iimeel kale (oo aan ahayn kan ciwaanka dugsigaaga) aadna la socoto farriimaha kusoo dhacaaya iimeelkaaga. Kuleejyada iyo jaamacadaha aad doorato aaya ku siin doona talaabooynkaaga xiga.

#### Kawaran haddii aan diyaar u ahay inaan cadsato kuleejka ama jaamacada kujira liiskayga? Arrintaan ma saameyn doontaa cadsigayga?

Looma baahna inaad ka welwesho codi kasta oo aad horey usoo gudbisay! Codsigaaga wali waa la baari eegi doonaa mana jirto baahi loo qabo inaad dib usoo cadsato. Fadlan ogsoonoo in haddii aad horay u soo gudbisay khidmada cadsiga, dib looma soo celin doona lacagtaas.

#### Warqadaan kuma arko magaca kuleejka aan xiiseynaayo. Taasi ma waxay la micno tahay inaan la iga diiwaangelin doonin kuleejkaas?

Qaar kamid ah kuleejyada iyo jaamacadaha aaya doortay inaysan bixin Diiwaan gelinta Tooska ah, sidaas oowgeed waxaa laga yaabaa inaadan kuleejka aad rabto ku arkin liiskaaga. Haddii ay jiraan kuleejyo kale oo aad xiisaynayo, waxaad u baahan doontaa inaad ka cadsato habraacyadooda diiwaanada caadiga ah.